

219_Maskin_käyttö_sotepalvelut_2
SOMALI

Waxaan ku talinaynaa in la isticmaalo afshareerka wakhtiga laga danaysanayo adeegyada sooshalka iyo caafimaadka

Waxaan ku talinaynaa in la isticmaalo afshareerka wakhtiga laga danaysanayo adeegyada sooshalka iyo caafimaadka xafiisyadooda iyo qolalkooda lagu sugo ballamaha. Taladani waxaay ku sallaysantahay arrinka ay waddanka oo dhan u dajjisay hay'adda Caafimaadka iyo nololwanaagga (THL) waxaayna ku socotaa dhamaan dadka qaangaarka ah iyo dhallinyarta 12 sano buuxisay.

Talobixinta ku sallaysan afshareerka waxaa an ula jeednaa in aan ku hubino in dhammaan dadka reer Helsinki ah ay helaan adeegyo amni ah sida ugu suuragalsan. Isla markaasna waxaan ku dadaalaynaa in shaqaalaha degmada laga ilaaliyo qaadidda xanuunka. Waxaan rajjaynaynaa in aad afshareerka aad isticmaasho isla marka aad soo gasho xafiiska gudahiisa.

Korona fayruska qaabka ugu wayn ee lookala qaado waa in hawada laga qaado marka uu qof qabaa tusaale ahaan hindhiso ama uu qufaco ee dhibco dareere ah oo ka soo go'ay ay hawada maraan. In sida loogu talo galay afshareerka loo isticmaalo waxaay ka hortagaysaa in uu cudurku ku faafo nawaaxiga iyada oo ay joogsanayaan dhibcaha qofka waxa ka soo go'ayaa ay hawada ku faafaan.

Magaalada ayaa u qaybinaysa dadka awoodooda dhaqaale liidato af iyo san daboollo

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan goobaha qaybinta ee Helsinki waxaa laga heli karaa ciwaanka www.hel.fi/kasvomaskit.

Talobixinta ku saabsan af iyo san daboolku waxaa ay sidoo kale khusaysaa goobaha iyo xaaladaha xiga

- Goobaha dadka ka dhexeeya ee gudaha ah iyo munaasabadaha gudaha lagu qabanqaabinayo ee dad badan ay joogaan.
- Munaasabadaha bannaanka lagu qabanqaabinayo ee aanay suuro gal u ahayn in la ilaaliyo in ay dadku isku jirsadaan in amni ah.
- Dugsiyada darajada labaad ah (oo ay ku jiraan dugsiyada sare) iyo jaamacadaha.
- Gaadiidka dadwaynaha.
- Dadka ku sii socda baadhitaanka koronada.
- Dadka baaritaanka fayruska koronada maray inta ka horraysa helidda natijada, haddii ay ku khasbanyihiin inay u baxaan meel ka baxsan guryahooda.
- Dadka safarka ah ee imaanaya Finland kana imaanaya soonaha halista ah marka ay ka baxayaan goobta ay dalka ka soo galeen iyagoo u socda karaantiil ama marka ay qasab ku tahay in xilliga karaantiil ay aadaan meel guriga bannaankiisa ah.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ebidemiyada fayruska Koronaha

www.thl.fi, <https://www.hel.fi/helsinki/coronavirus>